XUQUUQ

WAJIB

# XUQUUQDA IYO WAJIBAADKA

## Inta lagu gudajiro baaritanka booliiska

Hirgelin waxaa sameeyay adeegga isku duubnida dhaqamada kala duwan iyo booliiska Neuchâtel

ne.ch

# Aasaaska dimuqraa

Aasaaska,yoolalka,iyo meelaha uuka shaqeeyo booliska waxaa maamula Dastuurka,sharciyada federaalka iyo gobalka,iyo hishiisyada caalamiga ah. Maamulka gobalka ayaa maamula booliska,halka booliiska federaalka uu soo faragaliyo arrimaha qaranka.
Iyadoo ay kormeerayaan mas'uuliyiinta. **Booliiska waxey dhaqan galiyaan sharciga iyagoo ixtiraamaya xuquuqaha aasaasiga dammaanadaha dasturiga ah**.
Xaalado gaar ah uu sharciga dhigaayo,sharci fulinta ayaa laga yaabaa in looga baahdo iney xadidaan xaquuqaha iyo xorriyadaha qaarkood.
Buugaan yar waxaa loogu talagalay inaad kaheshid macluu-maad kusaabsan xaquuqda iyo waajibaadka inta lagu gudo jiro hubinta, si baaritaanka loogu sameyo jawi dagan oo ixtiraamleh.

## Shaqada booliska

Shaqada booliska waa inuu hubiyo ixtiraamka sharciga asagoo dammaanad qaadaya amniga dadweynaha, ilaalinta nidaamka iyo ilaalinta sharciga. Waxey udhaqantaa si waafaqsan mabaadi'da tusaalaha, saami-qaybsiga iyo dhexdhexaadnimada. Xakamaynta aqoonsiga waa mid kamid ah iyo eexla'aanta. Baaritaanka aqoonsiga waa qeyb kamid ah xuquuqdiisa.

# Baaritaanka booliska

**Booliiska iyo askarta xuduudka joogo oo kaliya ayaa loo ogalyahay iney dadka baaraan.**
Waa kuwan tallaabooyinka ugu muhiimsan ay qaadi karaan :

- **Hubinta aqoonsigaaga:** waa inaad dhiibtaa magacaaga oo dhameystiran,waqtiga aad dhalatay,cinwaanka aad degantahay shaqda aad kashaqeysid,magaca waalidkaa oo dhameystiran. Haddi aadan heysan wax aqoonsi ah,waxaa lagu weydiin karaa waxkasta oo shaqsiyadaada cadeenkara. Qolada nabadsugida amniga dadweynaha weyku weydiin karaan aqoonsigaaga.
- **Saldhiga booliiska:** Haddii lagaa shakiyo waxey ku geynkaraan xarunta saldhiga booliska si laguu baaro,waxeyna ku heyn karaan 24 saacadood,ilaa uu kordhiyo dacwad oogaha ama garsooraha.
- **Baaritaan:** dharkaaga,boorsadaada, gaarigaaga waa la baarikaraa. Baaritaanka qaaska ah sida xubnaha gaarka ah waxaa baari qof aad isku jinsitihiin ama dhaqtar, marka laga reebo xaaladaha degdega ah. In lagugu baaro bulshada dhexdeeda waa in ay ahaato oo kaliya baaritaan fudud (sida. : in jeebabkaaga ama dharkaaga labaaro) xushmada iyo sharafta qofka waa muhiim.
- **Taleefanka gacanta:** booliska waxey qaadan karaan taleefankaaga si loobaaro, laakiin helitaanka waxa kujira taleefanka waxey ubaahanyihiin inaad u ogolaato ama warqad maxkamadeed ayheystaan.
- **Awood isticmaalid:** qofka oo awood loo isticmaalo waxey imaankartaa oo kaliya haddii u qofku is adkeeyo caqabadna ayku noqoto qolada waxbaareyso iney shaqadeeda sharci fuliso,sida xadhig ama su’aalo, iyo si loo ilaaliyo dadka kale.
- **Katiinada gacanta:** waxaa loo isticmaalaa oo kaliya xaaladaha qatar ku ah naftaada ama nafkale ama laga baqaayo inaad baxsato.
- **Xiritaan:** xiritaan kumeel gaar ah rabshadeynta bulshada, qatar imaankarta,baxsasho,gacan kahadal,iyo dambiyada soo noqnoqdq.

# Xaquudada inta lagu guda jiro baritaanka booliska

**1. Xaq waxaad uleedahay inaad aamusto**

- Kuma qasbanid inaad kajawaabto su'aal kasta, marka laga reebo aqoonsigaaga.
  Waxaad oran kartaa: *« Waxba idinlama wadaagaayo.»*

**2. Xaqa Qareenka**

- Haddii lagu xiro, waxaad xaq u leedahay inaad dalbato qareen laga bilaabo bilaawga nidaamka waxaa laga yaabaa inaad adiga iska bixiso.

**3. Xuquuqda hantidaada gaarka ah**

- Booliiska wey qaadan karaan taleefankaaga laakiin ma baari karaan adigoon u ogalaan ama oggolaansho kaheysan maxkamada.
- Kuma qasbanid inaad dhiibto lambarka sirta taleefankaaga hadeysan wadanin warqad kasoo baxday maxkamada.

**4. Xaq u la haanshaha baritaan sabab la'aan ahe**

- Baaritaanka waa in lagu caddeeyaa sababo sharci ah (tusaale ahaan amniga,shaki ama dambigalid).

**5. Ka ilaalinta xadgudubka**

- Waxaad xaq uleedahay in lagula dhaqmo si ixtiraam leh, iyada oo aan lagu cunsuruyeen awoodna laguu sheegan.

**6. Qoddobo qaas ah loogu talagalay dhallaanka ama aan qaangaarin**

- Haddi aad tahay qof aan qaangaarin,waa in lawargaliyaa waalidkaa ama qofka masuulka kaa ah haddii ay dhacdo inlagu xiro ama lagaa qaato alaabtaada.

## Waa jibaadka kusaaran markaad lakulanto baaritaan boolis

**1. Bixi macluumaadkaaga shaqsi ahaaneed**

- Magacaaga oo dhameystiran, xiliga aad dhalatay iyo cinwaanka aad degantahay.
- Diidmo ama dhiibid macluumaad been ah waxey sababi kartaa ganaax.

**2. Raac tilmaamaha**

- Waa inaad raacdaa tilmaamaha askarta kusiiso si loo sugo badbaadada.
- Hadii aad aamin santahay in baritaankaas uusan sax aheyn, waad ka dacwoon kartaa hadhoow

**3. Xushmad iyo dabeecad masuulnimo**

- Muuji dhaqan ixtiraam leh.
- Kafagow dhaqdhaqaaq kasta oo shaki keeni kara.

**4. Waajibaadka inaadan dhaqaaqin**

- Hadii booliska kuweydiiyo inaadan kabixin meesha,waa inaad xurmeysaa oodan bixin amarkana qaadataa.

**5. Ha hor istaagin shaqada booliska**

- Ha faragalinin baaritaanka booliska hana isku dayin inaad macluumaad qarisid.

## Maxaa la sameeyaa haddii muran dhaco?

**1. Warbixinta qoro**

- Qoro magacyada,lambarada, taariiqda, saacada lagu baaray iyo goobta aad joogtid.
- Diiwaangali dhaqankasta oo dhibaato ah,kusaabsan qaab ladhaqankood.
- Hadii dad marqaati ah ay joogaan goobta kaqaado lambaradooda.

**2. Weydiiso talo qof sharci yaqaan ah**

- La tasho garyaqaan ama ururada difaaca xaquuqda dadka.
- La xiriir xafiiska Adeega isku xirka Dhaqamada kaladuwan (COSM) caawin ama taageerid si aad uheshid.

**3. Dacwo gudbiso**

- Ugudbi cabashadaada booliska,xafiiska xeer ilaaliyaha guud,ama COSM haddii aad aamin santahay in lagu takooray ama si qaldan lagula dhaqmay,ama markasta lagu koontaroolo sabab la’aan.

Wixii latashi ah ama sheegid ah lawadaag xafiska
**service de la cohésion multiculturelle:**

## Xafiiska wada tashiga

Xafiiskaan wuxuu dhibaa wadatashi qofkasta oo ladhibaateyay ama marqaatika ah cunsuriyad ama takoorid,ayadoo loo eegenin sharciga uu qofka heeysto.La tashiga waa bilaash,waana qarsoodi,waxaana laguu qaban turjumaan hadaad ubaahantahay.

## Xafiiska dacwadaha

Xafiiska adeegga isku xirka dhaqamada kaladuwan ayaa masuul ka ah soo dhaweynta,wargalinta,iyo taageeridda shaqsiyaadka rabo in ay xareeyaan dacwooyin kadhan si loogu gudbiyo qolada qaabilsan difaaca iyo la dagaalanka.
Warbixinta waxaa lagu sameyn karaa onlayn,ama xarunta ood aadid ama boostadda.

### Saacadaha lafuro xafiiska

**La Chaux-de-Fonds**
Place de la Gare 6
Tél. 032 889 74 42
Email : cosm@ne.ch
Isniinta ilaa jimcaha : 8h-12h iyo 13h30-17h

**Neuchâtel**
Tivoli 22
Isniinta ilaa qamiista : 14h-17h ama balan qaado

**Fleurier**
Rue du Temple 8
Isniin : 14h-17h ama balan qaado

© Sarah Zafferri

## Dukumentiyo tixraac ah

- Xeerka habka ciqaabta ee suisse (CPP)
- Xeerka dambiyada suisse (CP)
- Sharciga booliiska Neuchâtel (LPol)
- Xeerka isdhexgalka iyo ishu duubnida dhaqamada kala duwan (LICM)